

SOMALIA

# XAQIIQOYINKA IYO TIROOYINKA

JANAAYO - DISEMBAR 2024



## HAGAAJINTA XAALADAH NOLOOLEED IYO LA MACAAMILKA MAXABIISTA



- ICRC-da ayaa **51** booqasho ku tagtag **16** xabsi si ay u qiimeyso una hagaajiso xaaladaha nololeed iyo habka loola dhaqmo **3,751** maxabiis ah. **544** maxbuus ayaa la kormeeray si gaar gaar ah.
- 2,175** maxbuus ayaa ka faa'iideystay deeq isugu jirta dawooyinka aasaasiga ah iyo agabka dhaymada oo la gaarsiiyay **5** xabsi. Intaa waxaa dheer, **713** maxbuus oo qaba nafaqo-xumo ba'an iyo mid dhexdexaad ah ayaa la daweeeyay.
- 4,889** maxbuus oo ku jira **16** xabsi ayaa la gaarsiiyay agabka nadaafadda, oo ay ku jiraan saabuun, kaniiniga biyaha lagu nadiifiyo iyo jergaano, halka **3,310** maxbuus la gaarsiiyay agabka shahksiyadeed ee aasaasiga ah sida saliyaal, joodariyaal, maro-kanneecu iyo bustayaal.
- Intii lagu jiray bisha barakeysan ee Ramadaan, **4,105** maxabiis ah oo ku jira **10** xabsi ayaa helay saliid, misir, caano, timir, sokor, yaanyo shiishiid, iyo hilib ari si ay ugu dhammeystiraan afurkooda.
- 2,100** maxbuus ayaa ka faa'iideystay dayactir lagu sameeyay nidaamyada biyaha iyo biyo dhaamin deg-deg ah oo laga sameeyay **3** xabsi.
- 76** maxbuus ayaa awood u yeeshay in ay la xiriiraan qoysaskooda, kuwaa oo qaar ka mid ah la ogeysiyyat wakiillada qunsulkooda ama UNHCR.



## ILAALINTA DADKA RAYIDKA AH



- 125** oo ah dhacdooyinka colaadaha la xiriira ayey ICRC-du ka diiwaangalisay bulshooyinka ay dhibtu saameysay. Arintaa oo ay ka dhalatay:
  - Walaac ay soo gudbiyeen **185** qof ayaa lala soo qaaday kuwa hubka sita si loo raadiyo magdhow loogana hortago waxa mustaqbalka dhici kara.
  - 187** qof ayaa helay kaalmo si looga caawiyo ka soo kabashada dhibaatooyinka ka dhasha colaadaha iyo rabshadaha.
  - 47** qof ayaa loo diray hey'ado kale oo aan saaxiib nahay si ay u helaan adeegyada ay u baahanyihii.
  - ICRC-da ayaa **74** dhacdooyin ah la soo qaaday **11** ka mid ah dadka ay la hadasho intii lagu jiray **17** kulamo shacabka lagu matalay ah, iyada oo la raadinayo xaqbijin ku saabsan kiisas iyo dhacdooyin la aaminsyahay in ay xad gudub ku yihiin sharciga caalamiga ah ee bini'aadaminmada (IHL) iyo hurumarinta ilaalinta dadka rayidka ah.



### ILAALINTA XIRIIRKA QOYSA

- **194, 943** oo ah wicitaano taleefan bilaasha ah ayaa la siiyay qoysas kala lumay, iyada oo **60,977** Farriimaha Laanjeeyra Cas ahna la isweydaarsaday iyada oo la kaashanayo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS).
- Iyada oo la kaashanayo Bisha Cas (SRCS), ayaa **648** qof oo la la'aa oo ay xubnaha qoysaskoodu raadinayeen la helay. Isugeyn, **29** xero qaxooti oo ku yaala Soomaaliya ayaa la siiyay adeegyada Ilaalinta Xiriirkha Qoyska.



### KOR U QAADISTA SHARCIGA CAALAMIGA AH EE BINI'AADAMNIMADA (IHL)

- **1,475** oo ah xubno ka tirsan ciidamada ammaanka ayaa la baray sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada intii ay socdeen **23** kulamada faafinta oo dalka oo dhan ah, taa oo hagaajineysa ilaalinta dadka rayidka ah.
- **2,668** qof oo ay ku jiraan bulshooyin iyo hogaamiyeaal diimeed ayaa loo qabtay kulamo wacyi galin ah oo ku saabsan mabaadi'da aasaasiga ah ee xeerka colaadda hubeysan iyo mabaadi'da bini'aadamnimada.
- **120** macalimiin iyo arday ah ayaa looga warbixiy ICRC-da iyo sharciga caalamiga ah ee bini'aadamnimada.



## HORUMARINTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA



- **305,770** bukaan ayaa helay Daryeelka caafimaadka aasaasiga ah iyaga oo ka helay **26** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS. **5** ka mid ah xarumahan ayaa ahaa xarumaha caafimaadka guur guura oo laga hirgaliy meelaha fog fog oo ay colaaddu saameysay.
- **29,330** bukaan ayaa la daryeelay iyada oo la adeegsanayo Barnaamijka Daweynta Bukaan socodka **10** xarun caafimaad oo ka tirsan SRCS. **16,371** caruur ah oo ay da'doodu ka hooseyo **5** sano iyo **12,959** oo ah haween uur leh ah ayaa helay plumpysup, oo ah cunto nafaqo leh, iyo boorash si ay gacan uga geystaan ka hortagga nafaqoxumada.
- **17,045** baaritaano ah ayaa laga sameeyay qeybta gargaarka deg-degga ah ee isbitaalka Madina, isbitaalka Keysaney iyo isbitaalka guud ee Kismaayo. Dhammaan **3** isbitaal waxaa taageera ICRC.
- **1,610** caruur ah oo ka yar 5ta sano oo qabay nafaqo xumo aad u daran ayaa isbitaal la seexiyay iyada oo lagu daweyay Xarunta Dajinta xaaladda bukaannada ee Kismaayo.
- **2,648** bukaan oo laga keenay xarumaha caafimaadka ee SRCS ayaa loo gudbiyay isbitaal kala duwan si ay u helaan daryeel gaar ah iyada oo lacagta gaadiidkana laga bixiyay.
- **34** isbitaal ayaa ICRC ka helay taageero oo ay ku jiraan **68** agabka dhaawaca hubka lagu daweyyo iyo qalabka dhaymada.
- **26** xirfadleyaal caafimaad ah oo ka kala socday isbitaal kala yaala gobollada colaadda u nugul ee dalka, ayaa ka qeyb galay Koorsada Qolka Dhaawaca Deg-degga ah (ERTC) oo ay qabatay ICRC. Tababarkan ayaa waxaa lala kaashaday isbitaal Madina.
- **2** xarun caafimaad oo cusub ayaa SRCS looga dhisay Dhoobley iyo Buuloburte halka **2** xarun oo klae laga dayactiray Xabashwacle iyo Beledweyne.

## KA JAWAABIDDA SHUBAN BIYODDKA DARAN



- **352,325** qof ayaa ka qeygalay kulamo caafimaadka kor loogu qaadayo si looga hortago shuban biyoddkar daran.
- **9,919** xaalado shuban biyoddkar daran ah ayaa la aqoonsaday iyada oo loo gudbiyay xarumo SRCS ka tirsan oo kala duwan.

## DHAQAN CELINTA JIRKA



- **5,597** baaritaano ah ayaa laga fuliyay **3** xarumood oo dhaqan celinta jirka ah oo ay SRCS ku leedahay magaalooinka Muqdisho, Hargeysa and Gaalkacyo.
- Intaa waxaa dheer, **643** qeybaha jirka oo macmal ah, **2,479** qalabka xubnaha jirka kaalmeeya ah, **1,926** qalabka socodka kaalmeeya iyo biraha naafada, **359** kuraasta naafada iyo aaladaha lagu toosiyoo qaab-dhismeedka jirka, iyo **35** oo ah agabka howlaha nolol-maalmeedka (ADL) ayaa la qeybiyay.
- **194** caruur ah ayaa laga daweyay cago-qalooc.



## GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO DARYEELKA ISBITAALKA KA HOR



- **7,009** bukaan ayaa waxaa daadgureeyay **3** xarumood ee aambalaasta, oo ay ICRC taageerto ee ku yaala Muqdisho, Gaalkacyo iyo Laas Caanood.
- **1,022** oo ah bukaano qaba dhaawacyo hub ah ayaa helay daweynta gargaarka deg-degga ah.
- **1,037** qof oo ay ku jiraan mutadawiciin ka tirsan SRCS ayaa helay tababarka gargaarka deg-degga ah. **227** ka mid ah ayaa ahaa kuwa hubka sita.



## GARGAARKA DEG-DEGGA AH IYO SOO CELINTA HAB NOLOLEEDKA



- **271,080** qof oo ay colaaddu saameysay ayaa lagu caawiyay taageero lacageed. Intaa waxaa dheer, **6,000** qof ayaa helay taageero lacageed arintan oo qeyb ka ah ka jawaab celinteenaa fatahaadaha.
- **18,822** beeraley ah oo ku dhaqan jiinka wabiga ayaa la gaarsiiyay deeq lacageed si loogu caawiyo in ay dib u soo celiyaan hab nololeedkooda.
- **38,604** qof ayaa helay deeq jawaannada carrada ah si loogu caawiyo yarenta saameynta fatahaadaha.
- **250** xubnood oo ka tirsan iskaashatooyinka beeraleyda ayaa helay walxo ku saabsan beeraha, oo ay ku jiraan abuurka, bacrimiye, sunta cayayaanka, carro gedis, iyo tababarro ku aadan wax soo saarka abuurka mar walba la beerto.
- **166** oo ah shaqaalaha caafimaadka xoolaha ee bulshada ayaa ka qeyb qaatay korsooyin tababarro xusuusin ah iyaga oo sidoo kalena helay agabka bilowga ah ee caafimaadka xoolaha/lacago shuruudeysan, iyada oo lagu daweeeyay **117,750** neef.
- **1,315** oo ah dumar hogamiya qoysas ayaa lagu caawiyay lacago loogu talgalay in lagu taageero ganacsiyadooda yar yar.
- **150** ah dhalinyaro ka soo jeeda qoysas barakacayaal taag daran ah ayaa qeyb ka ahaa tababarro xirfadeed.
- **171,330** qof oo ku jira xeryaha qaxootiga ayaa helay alaabta guryaha, oo ay ku jiraan teendhooyin, saliyaal, iyo maro kaneeco, iyaga oo ka helay ICRC oo u soo marisay SRCS.





## FUDUDEYNTA HELITAANKA BIYO NADIIF AH, NADAAFADDA IYO ADEEGYADA KAABAYAASHA CAAFIMAADKA/XABSIYADA

- **465,121** qof ayaa biyo nadiif ah ka helay **70** nidaamyada biyaha ah.
- **212,560** qof ayaa helay agabka nadaafadda oo ay ku jiraan saabuun, kaniiniga biyaha jirgaano iyo macluumaad ku saabsan ka hortagga iyada oo laga jawaabayso cudurrada ba'an ee biyaha ka dhasha iyo koleeraha ka dillaacay **15** goobood oo Soomaaliya oo dhan ah.
- **92** Shaqaalaha ceelasha Wakaaladda Biyaha Puntland (PWDA) iyo Wasaaradda biyaha Galmudug ayaa tababar loo sameeyay iyada oo sidoo kalena la siiyay qalab ay howl-maalmeedkooda dayactirka ceelasha ku qabsadaan.
- Howlo dayactir ah ayaa laga fuliyay Isbitalka Guud ee Kismaayo oo ay taageerto ICRC si hagaajiyo nidaamka biyaha iyo korontada.





## U-XISSAB CELINTA DADKA AY DHIBAATADU GAARTAY

- **42,878** wicitaano ah ayaa laga helay bulshada ay dhibaatadu gaartay lagana shaqeyay iyada oo la adeegsanayo lambarka bilaaska ah ee (373).
- **18,060** ka mid ah wicitaanada ayaa la xiriiray barnaamijyada taageerada hab-nololeedka, arintan ayaa waxaa ku jra codsiyo lagu rabo kaalmo cusub ama dheeri ah oo dhinaca hab-nololeedka ah waxayna daba socdeen kaalmo hab-nololeed oo aanan la helin/wicitaano hubin ah.
- **1,267** ka mid ah wicitaanada ayaa la xiriiray barnaamijka Daryeelka Caafimaadka Aasaasiga ah waxaana ku jiray codsiyada kaalmada dawoojinka/cabashooyinka dawa yarida ka jirta xarumaha caafimaadka; iyada inta ugu badan oo ah **90%** ay muujinayeen sida ay uga mahadcelinayaan kaalmada ay heleen.
- Kormeerka kaalmada ka hor oo loo sameeyay **52,091** ka faa'iideystayaal ah ayaa loo diiwaan galiiy barnaamijyada taageerada kaalmada lacageed iyo hab-nololeedka oo laga sameeyay gobollo kala duwan oo Soomaaliya ah lana dhaqangaliyay iyada oo la adeegsanayo Xarunta wicitaanka iyada oo **49,290 (95%)** ka mid ahna la xaqiijiyay.
- **5,757** ka faa'iideystayaal deeq lacageed oo ujeedo badan ah, barnaamijo dakhli abuur ah, shaqo lacag ku badalashada iyo deeq loogu talogalay soo kabashada beeraha ayaa lala xiriiray wajiga kormeerka kaalmada ka dib si loo hubiyo in ay kaalmada heleen iyada oo **100%** la xaqiijiyay in ay heleen.
- **179** oo ah ka faa'iideystayaasha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (PHC) ee adeegyada SRCS ayaa la qiimeyay si loo xaqiijiyo hirgalinta gudbinta bukaanada, iyada oo **58 (87%)** ka mid ah ay xaqiijiyen in la gudbiyay lacagta gaadiidkana laga bixiyay.

### Xafiiska ICRC Muqdisho

Degmada Wadajir  
Xaafadda Buulo-xuubey  
Muqdisho, Soomaaliya  
[mog\\_mogadiscio@icrc.org](mailto:mog_mogadiscio@icrc.org)

### Xafiiska ICRC Kismaayo

Faanole isgoyska Qacle  
Ka soo horjeedka dhismaha Sadaam 2  
Kismaayo, Soomaaliya  
[Kis\\_kismayo@icrc.org](mailto:Kis_kismayo@icrc.org)

### Xafiiska ICRC Baydhabo

Dhabarka dambe siinka Somaphone  
Wadada Muqdisho-Baydhabo  
Baydhabo  
[bad\\_baidoa@icrc.org](mailto:bad_baidoa@icrc.org)

### Xafiiska ICRC Dhusamareeb

Dhusamareeb town  
Kadiye road off Dayax section  
Galmudug  
Soomaaliya

### Xafiiska ICRC Hargeisa

Ka soo horjeedka suuqa Cosob  
Degmada Jig Jiga Yer  
Hargeisa  
Somaliland  
[hag\\_mgmt\\_group@icrc.org](mailto:hag_mgmt_group@icrc.org)

### Xafiiska ICRC Garoowe

Halgan/qeybta A Lambar guri 0185  
Wadada Jimcaale  
Garoowe, Puntland  
Soomaliya  
[gar\\_garowe@icrc.org](mailto:gar_garowe@icrc.org)

### Xafiiska ICRC Jowhar

Wadada airport-ka  
Xaafda Hantiwadaag  
Laanta labaad ee Baryare  
Jowhar

### Xafiiska ICRC Nayroobi

Waddada Ngecha Kabete Hoose  
S.B 73226-00200  
Nayroobi  
[SOK-Nairobi@icrc.org](mailto:SOK-Nairobi@icrc.org)



**ICRC**

[www.icrc.org](http://www.icrc.org)  
All photos: ICRC  
© ICRC, January 2025

- [facebook.com/ICRCAfrica](https://facebook.com/ICRCAfrica)
- [twitter.com/ICRC\\_Africa](https://twitter.com/ICRC_Africa)
- [instagram.com/icrc\\_somalia](https://instagram.com/icrc_somalia)
- [blogs.icrc.org/Somalia](https://blogs.icrc.org/Somalia)